



REF: / / 2022

Date: 21/09/ 2022

## **Waaxda Xabkaha Iyo Feleenka**

Ku: agaasimaha guud W G & Dalxiiska

OG: wasiir ku-xigeenka W G & Dalxiiska

OG: wasiirka W G & Dalxiiska

**Ujeedo:** soo gudbin warbixinta kormeerka waaxda xabkaha & falleenka

Mudanayaal Wuxaan halkan idinku soo gudbinaynaa xogta warbixinta kormeerka waaxda xabkaha iyo falleenka.

Sida aad la socotaan waxay waaxdu samaysay kormeer kaas oo bilaamay 07/09/2022 soona soona dhamaaday 15/09/2022, kormeerkaas waxa aanu ku samaynay goboladda togdheer iyo sanaag waxaanu shirar ugu qabanay dadka ka ganacsada xabagta

- A) Burco
- B) Gar-adag
- C) Celafawayn
- D) Fadhigaab
- E) Kal-sheekh

Kuwaas oo dhammaantood ah goobaha xabagu ku soo hoyoto ee lagu safeeyo lagana soo raro, dhamaan ganacstadaa aanu la shirnay warbixintoodu waxa ay la xidhiidhay iib-xumo iyo suuq la, aan ku habsatay xabagtii. Waxna

nageeyeen goobahii xabagtu taalay oo aanu indhaha ka soo qaadnay xabagti oo taala.



## **Xogta kormeerka**

Waaxdu waxa ay booqatay 15 bakhaar oo lagu kaydiyo laguna safeeyo xabkaha oo ku yaala gobolka togdheer 7 bakhaar oo ku yaala ceelafwayn 4 bakhaar oo ku yaala fadhigaab iyo 5 bakhaar oo ku yaala kalsheekh sida ku cad lifaaqa sawiradda,

Mudanayaal wakhtigan hadda la joogo xaaladda beeyaddu waxa maraysaa meel aad u liidata waxaana aad hoos ugu dhacay qiimaha lakala siisanjiray beeyada Sida ku cad jaantuska ku lifaaqan warbixinta.

Waxaan dhamaan joogsaday raashinkii tagi jiray goobaha beyada ee xabagta lagu badalan jiray waxa goobaha ku qaali garoobay dhammaan maciishadii tusaale ahaan kiishka bariiska ah (25kg) waxa markii hore lagu kala badalan jiray 8kg oo xabag ah haddana waxaa uu marayaa (32kg).

Daqiiqa (25kg) waxaa lagu kala badalan jiray (7kg) haddana waxaa ay maraysaa (30kg) oo xabag ah.

Sonkor (25kg) waxaa lagu kala badalin jiray (12kg) xabag ah haddana waxa ay maraysaa (42kg) xabag ah.















# Waaxda Xabkaha iyo Falleenka

SHIRKA WADATASHIGA XABKHAHA IYO FALLEENKA  
OO SOCON DOONA MUDDO 7 MAALMOOD AH  
7th - 09 - 2022 ilaa 14th - 09 - 2022

kana Dhici doona Gobollada Togdheer iyo Sanadico & Ceerigaabo

SAGALSET



Qiimihii hore ee lakala siisan jiray xabkaha (1kg)

xabkaha	Qiimihii hore	Qiimaha danbe
malmal	1kg = \$8	1kg= \$ 4 ILAA \$5
Moxor (foox)	1kg = \$9	1kg = \$3
Maydi	1kg=\$7	1kg=\$3

Shaxdani waxa ay muujinaysaa hoos u dhaca ku yimi xabkaha kuwaas oo aanu xog-ururin ka samaynay intii aanu kormeerk ku jirnay.

Haddaba mudanayaal waxa ay beeyaddi maraysaa meel xaas-xaasi ah iyadoo oo ku yimi hoos u dhac aad u wayn ayaanay haddana jirin cid u diyaar ah iibkeeda iyo dhoofkedaba. Xabkaha waxaa la dhigaa bakhaaro kuwaas oo aan lahayn daryeel

waxana ay u baahan yihiin meel qabow mana jirto wax dab-dhaliye qabaw ah oo ku xidhan bakhaaradaas.

Sidaa daradeed xabagtu waxa ay ka soo baxday kadimadda bakhaaradda iyadoo dareere isu bedeshay mana jirto wax daryeel ah oo xiligan ay haysto xabagtu.

Mudaneyaal sida aad la socotaan cidda ugu badan ee deegaamadaas wax ka iibsataa waxa ay ahayd shirkadda asli maydi sidaan ku ogaanay kormeerkii aanu samaynay, shirkaadaas oo gabii ahaanba gacanta kala baxday ganacsigii xabkaha iyo faleenka waxa ay dhamaan bulshadu ka cabanaysaa in ay shirkadaas ay u daymaysan-yihiin oo ay siisan jirtay lacago hore marin ah oo ay ku hawl galaan ama raashin iyo saad kale wixii ay u baahan yihiin maanta aanay cid haynin ay xabagtii ka iibyaan,

Gadiidlayda baabuurta wada waxa ay iyaguna sheegeen in ay iska tuban yihiin oo aanay hayn cid ay wax u qaadaan maadama shirkaddii ay u shaqayn jireen meeshadda ka baxday bakhaarada raashinka ee waawaynaa ee gobolka sanaag iyo togdheer ayaa iyaguna muujiyey cabatin kaas la mid ah, anagu ka waax ahaan waxaanu u sheegnay dadwaynihii aanu la kulanay in shirkadda asli maydi aanay xukuumaddu wax lug ah ku lahayn shaqo joojinteeda wasaarad ahaana aan wax muran ahi ka dhaxayn shirkadaas waax ahaan aanan hayn wax qoraal oo shaqada lagaga joojiyey shirkadaas, cid nooga dacwootay shirkadaas aanay jirin shirkaddu wax dacwad ah aan noo keenin.

Sidaa daradeed sida ku cad shirkarka aanu qabanay shirkadda asli maydi waa mid iskeed u maamulatay danaheeda gaarka ah.

## **Talo soo jeedin**

Haddaba mudaneyaal markii aanu darasaad ku samaynay kormeerkayagii waxaanu ku talin lahayn sidan:

1. In qaranimo laysugu taago sidii suuq loogu helilahaa khayraadkeena dayacan

2. In wasaraaddu ka hawl gasho sidii wacyi-galin loogu samayn lahaa ganacsatada xabkaha niyadoodana kor loogu qaadi lahaa looguna dhiiri-galin lahaa in wax soo-soorka xabkaha kor loogu qaadi lahaa lana ilaaliyo Habka faleenka (si aan dhirta khasab looga doonin awooda wax ka baxsan)
3. In la joogteeyo socodka iyo la kulanka xagleyda
4. In la sameeyo gudiyo isku xidha xablayda iyo wasaaradda ganacsiga
5. In la sameeyo xeerkii lagu dhiqilahaa xablayda
6. In laga hawl galoo sidii dhaqaalaha ka soo baxa xabkaha uu ugu dhici lahaa dakhli ahaan wasaaradda ganacsiga.





www.aktiv.com - aktiv.com

### **Xubnaha kormeerka**

- |                           |                   |
|---------------------------|-------------------|
| 1. dhuux cabdilaahi cabdi | Agaasimaha waaxda |
| 2. Jaamac caalin cumar    | xubin             |
| 3. Jaamac cabdi diiriye   | xubin             |
| 4. Aadan yuusuf shiil     | darawal           |

### **Alla mahad leh**

**Agaasimaha waaxda xabkaha iyo faleenka**

**Dhuux Cabdilaahi Cabdi .....**